MNHPC | MINNESOTA NETWORK OF HOSPICE & PALLIATIVE CARE



# Daryeelka Horay Loo Qorsheysto iyo Dardaaranka Daryeelka Caafimaadka

## Su'aalaha Badanaa Leys Weydiiyo

MNHPC | MINNESOTA NETWORK OF HOSPICE & PALLIATIVE CARE

# Daryeelka Horay Loo Qorsheysto iyo Dardaaranka Daryeelka Caafimaadka

## Su'aalaha Badanaa Leys Weydiiyo

**Maxaa loola jeedaa daryeelka horay loo qorsheysto?** Daryeelka horay loo qorsheysto waa wada hadalka aad kuwa aad jeceshahay kala yeelatid waxa aad dooneysid in ay noqdaan xulashooyinkaada daryeelka caafimaadka haddii la gaaro waqti aadan awoodin in aad naftaada u hadashid. Kaddib marka aad yeelataan wada hadalkaan, waxaad rabitaankaada ku qori doontaa warqad lagu magacaabo dardaaranka daryeelka caafimaadka.

**Maxuu yahay "dardaaranka daryeelka caafimaadka"?** Dardaaranka daryeelka caafimaadka waa hal siyaabo aad ku sheegtid waxa aad rabtid iyo waxa aad jeceshahay in ay ahadaan daryeelka dhamaadka nolosha. Warqadaan waxay kuu fasaxi doontaa in aad:

- bixisid tilmaamo ku saabsan nooca daryeelka caafimaadka aad rabtid in lagu siiyo ama in aan lagu siinin
- Dooratid qof (dad), lagu magacaabo wakiilka (wakiilada) daryeelka caafimaadka, oo adiga kuu gaara go'aanada caafimaadka haddii aadan awoodin in aad soo gudbisid.

**Sidee ayaan wada hadal sida midkaan ula yeeshaa qoyskeyga ama takhtarka?** Waxaa jira siyaabo badan oo kugu kaalmeyn kara in aad bilowdid wada hadalka aad la yeelatid qoyskaada, asxaabta, iyo kuwa aad jeceshahay. Waxaa ka mid ah fiidiyowyo, wada hadalka lala yeesho qoyskaada iyo kuwa aad jeceshahay, iyo warqado diyaarsan aad la qeybsan kartid takhtarkaada. Waxaa kaloo jira dad soo qaatay tababar khaas ah oo adiga iyo qoyskaada ku kaalmeyn kara in aad wada hadashaan.

**Ma loo baahan yahay in aan samaysto dardaaranka daryeelka caafimaadka?** In aad qabtid dardaaranka daryeelka caafimaadka waa wax aad adiga dooratid. Dardaaranka daryeelka caafimaadka waa muhiim maxaa yeelay waxay takhtarkaada, asxaabta, iyo kuwa aad jeceshahay u sheegtaa noocyada daryeelka caafimaadka aad rabtid haddii aadan awoodin in aad gaartid go'aanadaada.

## La xariir MNHPC

**Wac (651) 917-4616 ama booqo www.mnhpc.org** haddii aad u baahan tahay kaalmo dheeraad ah oo ku saabsan sida loo helo bixiyeyaal ama haddii aad qabtid su'aalo guud oo ku saabsan qorsheynta daryeelka hore ama dardaarianka daryeelka caafimaadka adiga ama ama kuwa aad jeceshahay.



**Maxay tahay sababta loogu baahan yahay in aan yeesho dardaaranka daryeelka caafimaadka?** Dardaaranka daryeelka caafimaadka wuxuu qoyskaada iyo kuwa aad jeceshahay ku kaalmeeyaa in ay fahmaan daryeelka aad xulatay haddii aad si culus u xanuunsatid ama aad ku sugan tahay dhamaadka noloshaada. Waxay kugu kaalmeysaa in aad hubsatid in waxa aad qadarisid, waxaa aad aaminsan tahay, iyo rabitaankaada ku saabsan daryeelka caafimaadka, la maqlo haddii aadan awoodin in aad sameysid ama aad soo gudbisid go'aanadaada. Waa haddiyad lagu siiyay adiga iyo kuwa aad jeceshahay.

**Maxay tahay kala duwanaanta u dhexeyso dardaaranka nolosha iyo dardaaranka daryeelka caafimaadka?** Dardaaranka nolosha wuxuu badanaa ahamiyadda siiyaa xulashooyinka daryeelka caafimaadka mana u baahna in la magacaabo wakiilka daryeelka caafimaadka.

**Yaa ah wakiilka daryeelka caafimaadka?** Wakiilka daryeelka caafimaadka waa qof aad adiga dooratid si uu u kuugu gaaro go'aanada daryeelka caafimaadka marka aadan awoodin in aad naftaada u hadashid. Wakiilka daryeelka caafimaadka wuxuu ahaan karaa xubin ka tirsan qoyska ama saaxiib aad ku kalsoon tahay si aad u taageertid rabitaankaada daryeelka caafimaadka. Waxaad in badan qofkaan kala hadashaa rabitaankaada si aad u hubsatid in uu fahamsan yahay waxa aad rabtid iyo waxa aadan rabin.

MNHPC | MINNESOTA NETWORK OF HOSPICE & PALLIATIVE CARE

**Ma loo baahan yahay in aan la shaqeeyo qareen si aan u dhamaystiro dardaaranka daryeelka caafimaadka?** UMA BAAHNID qareen kuu buuxiya foomka. Minnesota, waa in aad saxiixdid dardaaranka daryeelka caafimaadka iyo waa in labo marqaati ama notaayo ay hubiyaan saxiixaada. Haddii aad dooratid in aadan isticmaalin qareen, ma jiro kharash ku baxa dhamaystirka dardaaranka daryeelka caafimaadka.

**Ma baddali karaa dardaarankeyga?** Haa! Waad baddali kartaa fikradaada waqti kasta. Mar kasta la hadal kuwa aad jeceshahay, asxaabta kuu dhaw, wakiilka daryeelka caafimaadka ama takhtarkaada ka hor inta aadan dhamaystirin foom cusub.

**Sidee ayaan u sameyaa dardaaranka daryeelka caafimaadka?** Waad wici kartaa ama waxaad booqan kartaa mid ka mid ah meelaha soo socda si aad u heshid macluumaad badan oo ku saabsan sida loo gudbiyo foomka:

- Weydii takhtarkaada, kalkaaliyaha, ama kaaliyaha takhtarka
- Booqo bogga Xushmada Loo Haayo Xulashooyinka Minnesota (Honoring Choices Minnesota), bogga internetka www.HonoringChoices.org;
- Wac Khadka Guddiga Xariirka Waayeelka Minnesota (Minnesota Board on Aging Senior LinkAge Line®), telefoonka 1-800-333-2433.



## Ilaha Daryeelka Horay Loo Qorsheysto

**Xushmada Loo Haayo Xulashooyinka**

*Hel Fududeeye:* bit.ly/1FUmyGZ

*Sheekooyinka Fiidiyowga:* bit.ly/1AOwx1p

*Fiidiyowyada Isbanish, Soomaali iyo Hmong:* bit.ly/1FuRNFs

**Qalabka Wada Hadalka** www.TheConversationProject.org

**Waxaad Dardaaranka Daryeelka Caafimaadka ka soo dagsan kartaa** bit.ly/1KEXsNE